HM Government

Grenfell community updates

# Grenfell Tower: September 2025 community update – Somali / Af-Soomaali

**Grenfell Tower: Xogaha Cusub ee Bulshada ee Sebteembar 2025**

Waxaan aqoonsannahay in Grenfell Tower uu muhiimad gaar ah oo qoto dheer u leeyahay dadka ay sida aadka ah u saamaysay masiibada iyo in dhulku uu yahay mid xasuus gaar ah ugu fadhiya qoysaska. Waxaan wadaageynaa macluumaadka ku saabsan sida dowlada iyo qandaraasleydeenu ay u bilaabayaan inay u dumiyaan Grenfell Tower si xushmad iyo taxadar leh, iyo fursadaha aad nagula hadli karto.

Xogtaan cusub waxaad ku heli kartaa xog dheeraad ah oo ku saabsan:

- **Inaaan u shaqeyneyno si taxadar leh si aan u dumino Grenfell Towere**
- **Wadaagista qorshooyinka maareynta bii'ada**
- **Sida aad noola hadli karto**
- **Taageerada caafimaadka iyo badqabka guud**

## Xog cusub oo ku saabsan sida aan si taxadar leh ugu dumineyno Grenfell Tower

Dowlada waxaa ka go'an inay hubiso in shaqada goobta loo fuliyo si heer sare ah iyo si lagu ixtiraamaayo muhiimadda dhismuhu leeyahay. Habraaca waxa loo dejiyay in lagu yareeyo carqaladeynta dadka ku nool, wax ku baranaya iyo dadka ka shaqeeya agagaarka iyo dadka u imanaya aagga si ay u muujiyaan ixtiraamkooda.

Bishii Luulyo, waxaanu wadaagnay macluumaadka ku saabsan sida qandaraaslaha Koowaad (DUK) uu ugu fulin doono shaqada si taxadar leh uuna u dumin doono Dhismaha iyo sida aan si xushmad leh alaabta u dhigi doono dhismaha. Waxaad akhrin kartaa xogtaan haddii aad gasho: Xogaha cusub ee goobta Grenfell Tower - GOV.UK.

Inta lagu jiray xagaagii, DCUK waxa ay fulisay hawlo diyaargaroow ah, oo ay ku jiraan rakibida wiish. Baanarka labaad ayaa la rakibay, baanarka korena meesha ayaa laga saaray. Baanarka labaadna waxaa la shidaa maqribkii ilaa 11da habbeenimo. Shaqada lagu saaraayo qolka warshadda (oo ay ku jireen kuleyliyaha iyo haanta biyaha) korka sare ee Dhismaha waa la dhameeyay. Shaqada dabaqyada la deganaa ayaa hadda bilaabanaysa. Duubistu waxay si tartiib ah hoos ugu dhigeysaa dheererka inta shaqadu (oo laga bilaabayo meesha ugu sareysa ee

dhismaha) xasaasiga ah ay hoos u socoto lana gaaraayo dabaq ka dabaq. Waxaan rajeynaynaa in shaqadu dhammaato 2027

### Wadaagista qorshayaasha maareynta deegaanka

Bishii Luulyo, waxaan wadaagnay macluumaadka ku saabsan sida aan ula socono una maareyno tayada hawada, buuqa iyo maamulka taraafikada si loo yareeyo carqaladeynta iyo inaan yareyno dareemida shaqada socoto sida ugu macquulsan.

Waxaad halkaan ka akhrin kartaa xogaha cusub ee bulshada:
Xogaha cusub ee goobta Grenfell Tower: La socoshada Deegaanka - GOV.UK

Xogtaan cusub waxay bixinaysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan la socoshadeena tayada hawada, boorka iyo heerarka qaylada, iyo tallaabooyinka aanu qaadi doono haddii sharciyada la jebiyo.

Xogta tayada hawada, sawaxanka iyo la socodka gariirku waxaa la daabici doonaa bil kasta.

Waxaan diyaarinaynaa qorshooyinka soo socda ee diyaarka ah, waxaana ku faraxsanahay inaan kaala hadalno adiga:

- Qorshaha maamulka tayada hawada iyo boorka (Air quality and dust management plan, AQDMP)
- Qorshaha maareynta buuqa iyo qaylada (Noise and vibration management plan, NVMP)

Qorshayaasha waxaa loo soo saaray DUK waxaana soo saaray Kormeerka iyo La-talinta Deegaanka Yurub (European Environmental Monitoring and Consultancy, EEMC), kuwaas oo ku takhasusay tixgelinta deegaanka ee shaqada dhismaha.

**La socoshada Buuqa iyo Sawaxanka**

NVMP waxay qeexaysaa qeexitaanada iyo meelaynta istiraatijiyadeed ee sawaxanka iyo la socoshada buuqa ee goobta oo dhan ka socda.

Qodobada muhiimka ah waxaa ka mid ah:

- Laba qalab oo la socda gariirka ayaa lagu rakibay dhinaca koonfureed ee goobta.
- Saddex qalab oo la socda qaylada ayaa la dhigay agagaarka xadka goobta si ay u bixiyaan caymis dhammeystiran oo awood u leh aruurinta xogta dhabta ah ee heerarka dhawaaqa iyo buuqa goobta dhismaha.
- Rakibida qalabkaan kormeerayaasha ah waxaa loogu talagalay in lagu taageero maareynta habboon iyo yareynta saameynta imaan karta, iyadoo la raacaayo habka ugu habboon iyo hagidda sharciyada.
- Goobta waxaa lagu qiimeeyay inay tahay goob buuqeedu sareeyo, NVMP waxay qeexaysaa qorshe yareynaaya kaas oo la sameeyay iyadoo laga jawaabayo xaalada. Qorshahaan waxaa ku jira labadaba tallaabooyinka yaraynta buuqa iyo borotokoolada dhaqanka wanaagsan ee la socda hagidda Madasha Waxqabadka ee Maamulka London (LANAF). Tallaabooyinkaan

waxaa loogu talagalay in si wax ku ool ah loo yareeyo saameynta qaylada ee dadka ku nool, ka shaqeeya iyo wax ka baranaya agagaarka iyo in la hubiyo u hogaansanaanta heerarka la xiriira.
- NVMP waxay qeexaysaa heerarka qaylada iyo gariirka iyo tallaabada la qaadi doono haddii heerarkaas la dhaafo.

**La socoshada Tayada Hawada**

Qorshaha Maareynta Tayada Hawada iyo Boorka (Air Quality and Dust Management Plan, AQDMP) ayaa dejisa qaab dhismeedka sharciga iyo hagida wargelinta la socodka tayada hawada, oo ay ku jiraan habka ugu wanaagsan ee laga helo Machadka Maareynta Tayada Hawada (Institute of Air Quality Managemen, IAQM) iyo Maamulka Weyn ee London (Greater London Authority, GLA).

**Qodobada muhiimka ah waxaa ka mid ah:**

- La socoshada Goobaha: Shan qalab oo la socda tayada hawada ayaa lagu rakibay aagga goobta, waxaana si xeeladaysan loo meeleeyay si ay uga tarjumaan jihada dabaysha ee jirta oo waafaqsan hagida IAQM.
- Saameynta la saadaaliyay: Marka la adeegsado tallaabooyinka yareynta ee lagu sheegay AQDMP, saamaynta boorku uu ku yeelanaayo aagga waxaa la qiyaasay inaysan mid wayn ahayn, waana mid wanaagsan IAQM iyo hagida GLA.
- Digniinta iyo Hab maamuuska Jawaabta: Qorshuhu wuxuu sharaxayaa tallaabada la qaadi doono haddii heerar gaar ah la ogaado, iyo in haddii xadka la cayimay la dhaafo shaqaalaha goobta ay baari doona sababta waxayna fulin doonaan tallaabooyin dheeraad ah oo lagu yareynayo sida ugu habboon.

Hay'ada Amniga Caafimaadka ee UK (UKHSA) waxay sii wadi doonaan inay qiimeeyaan oo ay la socdaan tayada hawada ee aagga ku xeeran Grenfell Tower inta ay shaqadu socoto. Warbixinada tayada hawada ayaa sii wadi doona in la daabaco bil kasta. Waxaad ka akhrisan kartaa warbixinta ugu dambeysay halkaan: Kormeerka deegaanka kadib dabkii ka dhacay Grenfell Towerka - GOV.UK

## Sida aad noola hadlayso ama aad wax badan u ogaanayso

Waxaan dooneynaa inaan macluumaadka ku wadaagno qaab adiga ku anfacaya. Fadlan nala soo xiriir haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaac ah oo la xiriira shaqooyinka ama aad dooneyso inaad nala hadasho. Ciwaanka iimaylkeena waa GrenfellTowerSite@communities.gov.uk.

Waxaan sii wadi doonaa inaan wadaagno wararka cusub ee joogtada ah iyo macluumaadka bilaha soo socda www.gov.uk/grenfell-community-updates (ama iskaan garee koodhka QR-ka ee hoose). Sidoo kale waxaad iska diiwaangelin kartaa fariimaha iimaylka. Haddii aad doorbidayso, waxaanu si toos ah kuugu soo diri karnaa wararkeena joogtada ah. Fadlan nagala soo xariir

GrenfellTowerSite@communities.gov.uk haddii aad jeclaan lahayd inaad macluumaadka kugula wadaagno qaabkaan.

Waxaad la kulmi kartaa saraakiisha iyo qandaraaslaheena koowaad si aad ugala hadasho shaqada, la wadaagto walaacyada aad qabto iyo si aad su'aalo u waydiiso kulamadeena caadiga ah. Waxaan diyaar u nahay inaan shaqsi ahaan ama koox ahaan idin kula hadalno waqtiga, taariikhda, iyo goobta kugu habboon ee aad dooneysaan.

### Haddii u baahan tahay taageerada caafimaadka iyo badqabka guud

Taageerada shucuurta iyo badqabka ee jirka waxay sii wadaa inay diyaar u tahay qoysaska murugaysan, dadka masiibada ka badbaaday, iyo dadka degan aagga goobta u dhaw inta lagu jiro shaqada sida taxadarka leh loogu duminaayo Dhismaha.

Haddii aad qabto wax walaacyo ah caafimaadka la xariira ah, fadlan la hadal dhakhtarkaaga guud (GP).

Haddii aad jeclaan lahayd inaad la hadasho qof, waxaad:

- Wici kartaa Adeegga Badqabka guud ee Grenfell ood ka wici karto 020 8637 6279 (8da subaxnimo ilaa 8da habbeenimo, maalin kasta)
- Haddii xaalad degdeg ah jirto, wac laynka tallada ee CNWL's Single Point of Access ood ka wici karto 0800 0234 650 (furan 24 saacadood maalintii, todobada maalmoodba asbuucii)
- Iimaylka: grenfell.wellbeingservice@nhs.net
- Booqo: www.grenfellwellbeing.cnwl.nhs.uk si aad u hesho xog dheeraad ah

Si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyay iyo xogo ku saabsan adeegyada la heli karo, booqo www.grenfell.nhs.uk.

Si aad u hesho xogihii u dambeeyay ee ku saabsan Grenfell Tower, iyo si aad iska qorto fariimaha iimaylka, fadlan booqo: www.gov.uk/grenfell-community-updates ama iskaan garee koodhka QR-ka ee hoose.

Waxaan jeclaan lahayn inaan adiga kaa maqalno sida aad doorbidayso inaad u hesho wararka ku saabsan shaqadeena ka jawaab celinta musiibadii ka dhacday Grenfell Tower. Haddii aad jeclaan lahayd, waxaad wadaagi kartaa ra'yigaaga adiga oo buuxinaya foomkeena jawaab celinta degdega ah:
Bulshada Grenfell: Foomka Xiriirka Jawaab Celinta - GOV.UK

**Kooxda maamulaysa goobta Grenfell Tower**

**Wasaarada Guriyeynta, Bulshooyinka iyo Dawlada Hoose**